N – Barasho wanaagsan.

11.6

B – Inantaas ma Sahraa magaceedu?

T – Maya, magaceedu Sahro ma aha, waa Aamino.

B – Aamino ayo?

T – Aamino Maxamuud.

B – Inankaas magaciisu ma Cali baa?

T – Haa, waa Cali Ismaaciil.

11.7

G – Magaceedu ma Safiyaa?

T – Maya, ma aha Safiyo. Waa Khadra.

K – Magacaa?

G – Magacaygu waa Geeddi.

K – Geeddi ayo?

G – Geeddi Yoonis.

K – Barasho wanaagsan.

G – Barasho wanaagsan

12.0

B – Magaceedu Maryan miyaa?

T – Maya, waa Xabiibo.

12.1

C – Sidee tahay?

T – Nabad.

C – Inantaas magaceedu Maryan miyaa?

T – Haa, waa Maryan.

C – Maryan ayo?

T – Maryan Cali.

12.2

M – Magacaa?

C – Cabdi.

M – Barasho wanaagsan, Cabdi.

C – Barasho wanaagsan, Maryan.

12.3

X – Ninkaas magaciisu Jaamac miyaa?

T – Maya, Jaamac ma aha. Magaciisu waa  
Kaahin.

X – Ma Kaahin Yuunis baa?

T – Haa, waa Kaahin Yuunis.

X – Kaahinow, magacaygu waa Xirsi.

K – Xirsi ayo?

X – Xirsi Cumar.

K – Barasho wanaagsan, Xirsi.

X – Barasho wanaagsan, Kaahin.

*Beginning in Somali (1966: 25–33)*

## 8. Nafaqada u roon indhaha


karooto



babbaay




nafáqo -áda nutrition | näring  
ú for | för  
róon good | nyttig  
indhó -áha eyes | ögon



caano



ukun



caano -áha milk | mjölk  
ukún -ta egg(s) | ägg

Kuwani waa cunto.

Waxa ay u roon yihiin indhaha.

yihiin (they) are | (de) är

Waa nafaqada indhaha.

## 8. Nafaqada u roon afka

liin

bagal



liin

yaanyo

yaányo -áda *tomato(es)* | *tomat(er)*

Kuwani waa cunto.

Waxa ay u roon yihiin afka.

Waa nafaqada afka.

áf -ka *mouth* | *mun*

*Waxbarashada Caafimaadka 2 (Muqdisho 1994: 11.3–12.1)*


# Unit 9

## 9.1 Bisad yar



Tani waa bisad yar. Bisadda yari waxa ay raadinaysaa hooyadeed.

**raadínayaa** *is looking for, is searching for\letar efter*



- Adigu ma tahay hooyaday?

- Maya, bisadda yareey. Anigu waxa aan ahay hal. Ma ihi hooyadaa.

**adíga** *you (SINGULAR)\du*

**ma** *question particle*

**máya** *no\nej*

**aníga** *I \ jag (LONG PRON.)*

**aan** *I \ jag (SHORT PRON.)*


**ahay** *(I) am\ (jag) är*

**hál -sha** *she camel \ kamelhona*

**má** *not\inte*


**má ihi (má ahi)** *(I) am not \ (jag)*

*är inte*



- Adigu ma tahay hooyaday?

- Maya, bisadda yareey. Anigu waxa aan ahay maroodi. Ma ihi hooyadaa.



- Adigu ma tahay hooyaday?

- Maya, bisadda yareey. Anigu waxa aan ahay haramcad. Ma ihi hooyadaa.


**haramcad** -ka cheetah, leopard,  
panther | panter, leopard



- Adigu ma tahay hooyaday?

- Maya, bisadda yareey. Anigu waxa aan ahay mas. Ma ihi hooyadaa.

**más** -ka snake | orm



- Adigu ma tahay hooyaday?

- Haa, bisadda yareey. Anigu waxa aan ahay bisad. Waxa aan ahay hooyadaa.

**háa** (interj.) yes | ja

*Af Soomaali, Hargeysa 2010: 135–136*

## 9.2 Maxaa uu samaynayaa?



Maxaa uu samaynayaa Xasan?

Xasan wax baa uu akhrinayaa.

Isagu wax baa uu akhrinayaa.

Xasan waxa uu akhrinayaa buug.

Isagu waxa uu akhrinayaa buug.



Maxaa uu samaynayaa Xasan?

Xasan waxa uu nadiifinayaa daaqad.

Xasan waxa uu nadiifinayaa dariishad.<sup>S</sup>


Isagu waxa uu nadiifinayaa daaqad.

Isagu waxa uu nadiifinayaa dariishad.<sup>S</sup>

**maxáa?** *what? | vad?* (WITH FOCUS)  
**samaynayaa** *is doing, is making | gör*

**isága** *he | han*  
**wáx -a** *thing; something | sak; nágot*  
**báa** focus particle: highlights the preceding phrase  
**akhrínayaa** *is reading | läser*  
**búug -ga** (En.) *book | bok*

**nadiifínayaa** (Ar.) *is cleaning | rengör*  
**daaqád -da** *window | fönster*  
 = **dariishád<sup>S</sup> -da**







Maxaa uu samaynayaa aabbe?

Aabbe waxa uu tirinayaa lacag.

Isagu waxa uu tirinayaa lacag.

*tirínayaa is counting | räknar*  
*lacág -ta money | pengar*



Maxaa uu samaynayaa aabbe?

Aabbe wax baa uu cunayaa.

Isagu wax baa uu cunayaa.

*cúnayaa is eating | äter*

*Af Soomaali 1, Muqdisho 2001: 48–49*

*Af Soomaali 1, Hargeysa 2010: 57–58*


### 9.3 Maxaa ay samaynaysaa?



Maxaa ay samaynaysaa Faadumo?

Faadumo wax baa ay akhrinaysaa.

Iyadu wax baa ay akhrinaysaa.



Maxaa ay samaynaysaa Caasho?

Caasho waxa ay nadiifinaysaa daaqad.

Caasho waxa ay nadiifinaysaa dariishad.<sup>5</sup>

Iyadu waxa ay nadiifinaysaa daaqad.

Iyadu waxa ay nadiifinayaa dariishad.<sup>5</sup>



Maxaa ay samaynaysaa hooyo?

Hooyo waxa ay tirinaysaa lacag.

Iyadu waxa ay tirinaysaa lacag.



Maxaa ay samaynaysaa hooyo?


Hooyo wax baa ay cunaysaa.

Iyadu wax baa ay cunaysaa.

*Af Soomaali 1, Muqdisho 2001: 52–53*

*Af Soomaali 1, Hargeysa 2010: 63–64*

## 9.4 Kani waa maxay?



Kani waa dugsiga Faadumo.



Tani waa macallimaddeeda.



Maxaa ay samaynaysaa Faadumo?  
Waxa ay tirinaysaa ulo.

**ul -sha** stick | pinne  
**uló** PLURAL



Maxaa uu samaynayaa Xasan?  
Waxa uu qorayaa magaciisa.

**qórayaa** (Ar.) is writing | *skriver*



Tani waa macallimaddooda.  
Waxa ay sawiraysaa rati.

**-tóoda, -dóoda** *their*

**sawírayaa** (Ar.) is drawing | *ritar, tecknar*

**ratí -ga** pack camel | *lastkamel*




Maxaa ay samaynaysaa macallimaddu?  
Waxaa ay akhrinaysaa sheeko.

sheeko -áda story | berättelse

*Af Soomaali 1, Muqdisho 2001: 88-89 & Af Soomaali 1, Hargeysa 2010: 102-103*

## 9.5 Xisaab




Soddon iyo lix waa ay ka yar tahay konton iyo labo.<sup>S</sup>

Konton iyo labo waa ay ka weyn tahay soddon iyo lix.<sup>S</sup>

Shan iyo afartan waa ay ka weyn tahay shan iyo labaatan.<sup>N</sup>

Shan iyo labaatan waa ay ka yar tahay shan iyo afartan.<sup>N</sup>

ká (prep.) from, of, than | från, av, än




Toban iyo shan waa ay ka yar tahay toban iyo sagaal.<sup>S</sup>

Toban iyo sagaal waa ay ka weyn tahay toban iyo shan.<sup>S</sup>


Lix iyo afartan waa ay ka weyn tahay sagaal iyo soddon.<sup>N</sup>

Sagaal iyo soddon waa ay ka yar tahay lix iyo afartan.<sup>N</sup>



Labaatan iyo toddobo waa ay ka yar tahay labaatan iyo siddeed.<sup>S</sup>  
 Labaatan iyo siddeed waa ay ka weyn tahay labaatan iyo toddobo.<sup>S</sup>

Soddon waa ay ka yar tahay konton.  
 Konton waa ay ka weyn tahay soddon.




Konton iyo afar waa ay ka weyn tahay soddon iyo toddobo.<sup>S</sup>  
 Soddon iyo toddobo waa ay ka yar tahay konton iyo afar.<sup>S</sup>

Saddex iyo afartan waa ay ka yar tahay labo iyo toddobaatan.<sup>N</sup>  
 Labo iyo toddobaatan waa ay ka weyn tahay saddex iyo afartan.<sup>N</sup>


*Xisaab 1, Muqdisho 2001: 108*

## 9.6 Ka dheer




Cali waa ka dheer yahay Cusmaan.  
Cusmaan waa ka gaaban yahay Cali.

**dhéer** (adj.) *long, tall, high | lãng, hög*  
**gaabán** (adj.) *short, low | kort, låg*




Durbaanka T waa ka dheer yahay  
durbaanka B.  
Durbaanka B waa ka gaaban yahay  
durbaanka T.

**durbáan -ka** *drum trumma*




Minaaradda B waa ka gaaban tahay  
minaaradda T.  
Minaaradda T waa ka dheer tahay  
minaaradda B.


**minaarád -da** (Ar.) *minaret minaret*



Faadumo waa ka dheer tahay Caasho.  
Caasho waa ka gaaban tahay Faadumo.



Cumar waa ka dheer yahay Xaliimo.  
Xaliimo waa ka gaaban tahay Cumar.



Geedka B waa ka dheer yahay  
geedka T.  
Geedka T waa ka gaaban yahay  
geedka B.

*géed -ka tree, plant träd, växt*






Qalinqoriga X waa ka dheer yahay  
qalinqoriga Y.

Qalinqoriga Y waa ka gaaban yahay  
qalinqoriga X.

qálin -ka (Ar.) pen | penna  
qalinqóri -ga pencil | blyertspenna



Dhalada L waa ka dheer tahay  
dhalada M.

Dhalada M waa ka gaaban tahay  
dhalada L.

dhálo -áda bottle | flaska

Xisaab 1, Muqdisho 2001: 92

# Unit 10

---

13.0

- Magaciisu waa maxay?
- Axmed weeye magaciisu.

wéeye < wáa+yahay

13.1

- Waa maxay magaciisu?
- Magaciisu Xasan weeye.

13.2

- Magaciisu waa maxay?
- Magaciisu weeye Cabdi.

13.3

- Sidee tahay?
- Waa nabad.
- Ninkaas magaciisu waa maxay?
- Axmed weeye magaciisu.

13.4

- Ma nabad baa?
- Haa, waa nabad.
- Ninkaas magaciisu ma Xuseen baa?
- Haa, magaciisu Xuseen weeye.

13.5

- Magacaa?
- Magacaygu Xamiid weeye. Adigana magacaa?
- Cali weeye magacaygu.
- Ninkaas magaciisu Muuse miyaa?
- Maya, magaciisu Nuux weeye.

14.0

- Waa maxay magaceedu?
- Cadar weeye magaceedu.

14.1

- Magaceedu waa maxay?
- Magaceedu Canab weeye.

14.2

- Waa maxay magaceedu?
- Saynab magaceedu weeye.

14.3

- Inantaas waa maxay magaceedu?
- Cadar weeye magaceedu. Adigana magacaa?
- Xasna weeye magacaygu.
- Xasna ayo.
- Xasna Muuse.

14.4

- Magacaa?
- Magacaygu Xaliimo weeye.
- Cali weeye magacaygu.
- Ninkaas magaciisu waa maxay?
- Magaciisu waa Axmed.

15.0

- Kani waa kuma?
- Kani waa Xasan.

**kani** (m.) *this | det här*  
**kúma?** (m.) *who? | vem?*

15.1

- Kani waa kuma?
- Kani waa Cumar.
- Cumar ayo?
- Cumar Nuur. Magacaa?
- Magacaygu Maxamuud weeye.

15.2

- Waa kuma kani?
- Kani waa Saciid.
- Saciid ayo?
- Saciid Aadan. Magacaagu waa maxay?
- Magacaygu waa Nuux.

*Beginning in Somali (1966: 34–40)*

## 10. Ardo iyo Digaagaddeedii



Ardo digaagad ayay leedahay.

-ii indicates that the thing is supposed to be known from before

Ardo girl's name | flicknamn  
**digaagád -da** *hen | höna*  
cf. **digáag -ga** (coll.) *hens, chicken*  
(meat) | *höns, kycklingkött*




Digaagaddeedu waa bunni.

**búnni -ga** *colour of coffee, brown thing | brun sak, kaffefärg*



Ardo digaagaddeedii ayay daba ordaysaa.

**dabo** *after, behind | efter, bakom*  
**ordayaa** *is running | springer*



Digaagaddeeduna way ordaysaa.

*Ardo iyo Digaagaddeedii, Fasalka 1aad, Toddobaadka 1aad–12aad, Buugga 4aad, Xafiiska Waxbarashada, Jigjiga, Itoobiya 2016*

The Somali Regional State of Ethiopia



Flag of Somali Reg. State



Flag of Ethiopia





*Illustrations from Wikimedia*

# Unit 11

## 11.1 Dugsiga Sahra iyo Axmed

Kani waa dugsiga Sahra iyo Axmed. Waa dugsi yar oo wanaagsan.




Sahra waxa ay tagaysaa dugsiga.

- Subax wanaagsan, Sahra.
- Subax wanaagsan, Faadumo.

Axmed waxa uu salaamayaa macallinka.

- Nabad!




Sahra fasalka ayaa ay galaysaa.

Fasalku waa weyn yahay.


Ardayduna waa badan yihiin.

*Af Soomaali 1, Muqdisho 1994: 189-213*


## 11.2 Akhriska iyo qorista




Sahra wax baa ay akhrinaysaa.  
Waa ay **jeceshahay** akhriska.




Ardaydu waa **ay akhrinayaan**.  
Waa **ay** jecel yihiin akhriska.




Axmed waa uu qorayaa.  
Axmed waxa uu qorayaa eray.  
Waa uu **jecel** yahay qorista.



Xasan wax baa uu sawirayaa.  
Waxa uu sawirayaa guri.




Ardaydu waa **ay heesayaan**.  
Waxa **ay heesayaan** Heesta Calanka.  
Waa **ay** jecel yihiin Heesta Calanka.



Ardaydu waa **ay ordayaan**.  
Waa **ay tartamayaan**.  
Waa **ay** jecel yihiin tartanka.

*Af Soomaali 1, Muqdisho 1994: 198-223*

## 11.3 Kubbadda cagta




Kani waa bas weyn oo fiican.  
Ardaydu waa ay tagayaan.  
Waxa ay tagayaan dugsi kale.




Sahra waxa ay fiirinaysaa dheel.  
Maxaa la dheelayaa?  
Waxa la dheelayaa kubbadda cagta.



Axmed waa uu gaajoonayaa.  
Rooti iyo caano baa uu **rabaa**.



Axmed guriga ayaa uu u socdaa.  
Waxa uu la **socdaa saaxiibkiis**.



Faadumo waxa ay rabtaa liin.  
Waa ay jeceshahay liinta.



Axmed waxa uu leeyahay baabuur yar.  
Waa uu jecel yahay baabuurkiisa.

*Af Soomaali 1, Muqdisho 1994: 222-243*



## 11.4 Hooyada iyo carruurta



Kuwani waa Maryan carruurteeda.

- Kuwani waa carruurtayda.

Magacoodu waa Faadumo,  
Luul, Cabdi, Nuur iyo Sahra.



Kani waa Cali.

Kani waa Cali saaxiibkiis.

Saaxiibkiis waa wiil wanaagsan.

– Kani waa saaxiibkay.

Magaciisu waa Warsame.



- Tani waa walaashay.

Magaceedu waa Safiya.

Walaashay Safiya waa macallimad.




- Tani waa hooyaday.

Magaceedu waa Cambara.

## 11.5 Aabbahay



- Kani waa aabbahay.  
Magaciisu waa Cumar.  
Aabbahay waa dukaanle.



- Kani waa macallinkayga.  
Magaciisu waa Xarbi.  
Xarbi waa macallin wanaagsan.



Maryan waxa ay leedahay carruur badan.



Cambara waxa ay leedahay hal wiil.

*Waxbarashada Caafimaadka 3, Muqdisho 1994: 1-4, 37*

# Unit 12

---

16.0

- Waa tuma tani?
- Tani waa Xaliimo.

16.1

- Waa tuma tani?
- Tani waa Kinsi.
- Kinsi ayo?
- Magaceedu waa Kinsi Caydiid.

16.2

- Tani waa tuma?
- Waa Caasha.
- Magacaagu waa maxay?
- Ismaaciil. Magacaa?
- Cabdi weeye magacaygu.

16.3

- Waa kuma kani? Ma Cabdi baa?
- Maya, Maxamed weeye.
- Inanta waa maxay magaceedu?
- Tani waa Sahra.
- Barasho wanaagsan.
- Barasho wanaagsan.

17.0

- Kani ma Muusaa?
- Maya. Kani Muuse ma aha. Waa Cusmaan.

17.1

- Kani ma Cumar baa?
- Maya, Cumar ma aha.
- Ma Cali baa?
- Haa, waa Cali.

- Cali ayo?
- Cali Ismaaciil.

## 17.2

- Tani ma Sahraa?
- Haa, waa Sahra.
- Sahra ayo?
- Sahra Muuse.
- Magacaygu waa Yuusuf.
- Barasho wanaagsan, Yuusuf.
- Barasho wanaagsan, Sahra.

## 17.3

- Caliyow, kani ma Nuur baa?
- Maya, kani ma aha Nuur. Waa Geeddi.
- Geeddi ayo?
- Geeddi Cumar.

## 18.0

- Muxuu qabtaa?
- Waa karraani.
- Saaxiibkiisna?
- Macallin weeye.

## 18.1

- Kani ma Cusmaan baa?
- Haa, kani Cusmaan Nuur weeye.
- Muxuu qabtaa?
- Waa macallin.

## 18.2

- Axmed muxuu qabtaa?
- Waa siyaasi.
- Saaxiibkiisna?
- Saaxiibkiisna waa ministarka tacliinta.

18.3

- Yuusuf ma wasiir baa?
- Maya, waa macallin.
- Maxamedna ma arday baa?
- Maya, waa karraani.

*Beginning in Somali (1966: 41–47)*

## 12.1 Soomaalidu Waa Qoyskeenna Weyn



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya  
Wasaaradda Waxbarashada,  
Hiddaha iyo Tacliinta Sare

# CILMIGA BULSHADA

Fasalka Koowaad



Buugga Ardayga

Dugsiga Hoose


Casharka Shanaad:

## Soomaalidu Waa Qoyskeenna Weyn




Anigu waxa aan ahay Soomaali.

Adigu waxa aad tahay Soomaali.



Iyagu waxa ay yihiin Soomaali.

Dhammaanteen waxa aan nahay Soomaali.




Qoysaskani dhammaantood waa Soomaali.

Waxqabadka toban iyo toddobaad:

Waxa aan isku aaddinayaa weerahan iyo sawirradooda.

b- Qoyskaani dhammaantood waa Soomaali.



t- Wiilkaani waa arday Soomaaliyeed.



j- Gabadhaani waa ardayad Soomaaliyeed.



*Cilmiga Bulshada 1, Muqdisho 2018: 13–17*



## 12.2 Immisa buug?

Cumar dukaankiisu waa yar yahay.

Maryan carruurteedu waa badan yihiin.

Cali macallinkiisu waa wanaagsan yahay.

Cali hooyadiis waa jirran tahay.

Maryan wiilkeedu waa yar yahay.

Maryan gabarteedu waa ladan tahay.



Cali waxa uu haystaa laba buug.



Najma waxa ay haysataa saddex buug.




Dhammaan Cali iyo Najma waxa ay haystaan shan buug.

# Unit 13

---

## 13.1 Rooble qoyskooda



Fiiri sawirkan.

Kani waa Rooble qoyskooda.

Immisa qof baa uu ka kooban yahay Rooble qoyskoodu?



Tani waa Maryan.

Maryan waa Rooble hooyadiis.

Maryan waa dawaarley.

Waxa ay toshaa dharka.



Kani waa Jaamac.

Jaamac waa Rooble aabbihiis.

Jaamac waa dukaanle.


Waxa uu ka shaqeeyaa dukaankiisa yar.



Tani waa Aamina.

Aamina waa Rooble walaashiis.

Waa maxay shaqada ay Aamina samaynaysaa?



Kani waa Axmed.

Isagu waa Rooble walaalkiis.


Waa maxay shaqada uu Axmed samaynayaa?

Qof waliba waa in uu caawiyaa hooyadiis iyo aabbihiis.

Waa maxay shaqada aad adigu guriga ka samaynaysaa?

*Cilmiga bulshada 1, Muqdisho 2001: 1-3*

## 13.2 Hodan qoyskooda



Fiiri sawirkan.

Kani waa Hodan qoyskooda.

Waa immisa qof Hodan qoyskoodu?


Hodan qoyskoodu waxa uu ku nool yahay meel yar.



Faarax waa Hodan aabbaheed.

Faarax waxa uu falayaa beerta.

Faarax waa beerfale.



Xabiiba waa Hodan hooyadeed.

Xabiiba waxa ay lisaysaa sac.

Iyadu waa xaaska beerfalaha.



Tani waa Xaawo.

Xaawo waa Hodan walaasheed.

Waxa ay <sup>hadhuudh<sup>N</sup></sup> haruur<sup>S</sup> siinaysaa  
digaagga.

Ka dibna waxa ay tagtaa dugsiga.



Kani waa Cismaan.


Cismaan waa Hodan walaalkeed.

Waxa uu waraabinayaa geedo  
yaryar.

Ka dibna waxa uu tagaa dugsiga.

*Cilmiga bulshada 1, Muqdisho 2001: 4–6*

### 13.3 Geeddi qoyskooda



Fiiri sawirkan.

Kani waa sawirka *Geeddi qoyskooda*.

*Geeddi qoyskoodu* waa reer-guuraa.

Reer-guuraagu waxa uu dhaqdaa xoolo.



Tani waa *Caasha*.

Iyadu waa *Geeddi hooyadiis*.


Waxa ay tolaysaa haan.



Kani waa *Maxamed*.


Isagu waa *Geeddi aabbihiis*.

Waxa uu waraabinayaa geela.



Kani waa Geeddi.

Waxa uu la joogaa adhi<sup>N</sup>.  
Waxa uu la joogaa ari<sup>S</sup>.




Tani waa Bilan.

Bilan waa Geeddi walaashiis.

Qoyska ayaa ay cunto  
u karinaysaa.

*Cilmiga bulshada 1, Muqdisho 2001: 7–9*


## 13.4 Saynab qoyskooda



Saynab qoyskoodu waxa uu ku nool yahay badda agteeda.

Qoysku waxa uu ku nool yahay xeebta.

Iyagu waa kalluumaysato.




Kani waa Suudi.

Suudi waa Saynab aabbaheed.

Suudi waa kalluumayste.

Badda ayaa uu kalluun ka dabanayaa.



Tani waa Sahra.

Sahra waa Saynab hooyadeed.

Waxa ay kalluun ku iibinaysaa suuqa.





Tani waa Saynab.

Waxa ay shiilaysaa kalluun.

Kalluunka waxa ay u shiilaysaa qoyskooda.



Kani waa Cali.

Isagu waa Saynab walaalkeed.

Waxa uu aabbihiis u tolayaa shabag kalluun.

*Cilmiga bulshada 1, Hargeysa 2010: 10–12*

# Unit 14

---

## 19.0

- Maxaad ka shaqaysaa?
- Macallin baan ahay.

## 19.1

- Maxaad sheegtay?
- Nabad.
- Cali muxuu ka shaqeeyaa?
- Waa askari.
- Saaxiibkiisna?
- Waa dukaanle.

## 19.2

- Maxaad ka shaqaysaa?
- Waxa aan ahay ministarka tacliinta.
- Calina muxuu ka shaqeeyaa?
- Waa dukaanle.

## 19.3

- Magacaa?
- Magacaygu waa Yuusuf Ismaaciil.
- Maxaad ka shaqeysaa?
- Waxa aan ahay turjubaan.
- Nuurna?
- Waa ministarka difaaca.

## 20.0

- Ma macallin baa tahay, Cali?
- Haa, macallin baan ahay.

## 20.1

- Ma darawal baad tahay?
- Haa, darawal baan ahay.
- Cumar ma darawal baa?
- Maya. Waa kuuli.

## 20.2

- Ma nabad baa?
- Waa nabad. Iska warran?
- Nabad.
- Ma macallin baad tahay?
- Maya, waxa aan ahay karraani.
- Saaxiibkaana karraani miyaa?
- Maya, waa arday.

## 20.3

- Ninkaas magaciis?
- Waa Yuunis.
- Yuunis ayo?
- Yuunis Cali.
- Ma askari baa?
- Haa, waa askari.

## 21.0

- Ma macallimad baa?
- Haa, waa macallimad.

## 21.1

- Xaliimo ma macallimad baa?
- Haa, waa macallimad.
- Saaxiibkeedna ma macallin baa?
- Haa, waa macallin.

## 21.2

- Tani ma karraaniyad baa?
- Maya, waa askariyad.
- Magaceed?
- Magaceedu waa Caasho.
- Caasho ayo?
- Caasho Cali.

21.3

- Caashi ma ardayad baa?
- Haa, Caashi waa ardayad.
- Tani magaceedu waa maxay?
- Waa Nuura.
- Macallimad miyaa?
- Haa, waa macallimad.

*Beginning in Somali (1966: 48–56)*

## 14.1 Qoys beeraley ah



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya  
Wasaaradda Waxbarashada,  
Hiddaha iyo Tacliinta Sare

# CILMIGA BULSHADA

Fasalka Koowaad



Buugga Ardayga

Dugsiga Hoose

Casharka labaad:

## Qoys beeraley ah



Qoyska Cali waxa uu deggan yahay beertooda meel u dhow.

Qoyska Cali waxa ay fashaan beeraha.

Aabbihiis waa beeraley.

Nolosha qoyska Cali waxa ay ku tiirsan tahay dalagga beerta.



Caasharka afraad:

## 14.2 Qoys kalluumaysato ah



Qoyska Faarax waxa uu deggan yahay meel xeeb ah.

Qoyskiisu waa kalluumaysato.

Nolosha qoyskiisu waxa ay ku tiirsan tahay dabashada kalluunka / mallaayga<sup>S</sup>.

Aabbihiis waa kalluumayste.

Waxa uu soo dabtaa kalluunka / mallaayga<sup>S</sup>.

Waxqabadka toban iyo lixaad:

Waxa aan u sheegayaa fasalka in qoyskaygu uu deggan yahay meel xeeb ah.

Waxa aan u sheegayaa in qoyskaygu yahay kalluumaysato.

## 14.3 Xisaab

Cali waxaa uu leeyahay afar buug.

Caashana waxaa ay leedahay saddex buug.

Cali iyo Caasha waxaa ay leeyihiin toddoba buug.

Reer Cumar waxaa ay leeyihiin laba sac.

Reer Guuleedna waxaa ay leeyihiin saddex sac.

Labada reer waxaa ay leeyihiin shan sac.

Caasha waxaa ay haysataa toban shilin.


Safiyana waxaa ay haysataa shan shilin.

Caasha iyo Safiya waxaa ay haystaan shan iyo toban shilin.




# Unit 15


## 15.1 Layliyo




Sawir jidka!



Raadi cuntada!



Sawir masawirkaaga!  
Ku qor magacaaga!



Ku sawir bisad kursiga dheer hoostiisa!



wiil koob jid geed

Akhri oo sawir!



gabar

gabar



bisad



wiil



ilmo

Ku qor eray ku habboon sawirka!

b\_s m\_s

bas mas

Ku buuxi "a" oo akhri!

w\_\_l

wiil

m\_\_s


miis

d\_\_n

diin

Ku buuxi "ii" oo akhri!

## 15.2 Maxaa ay samaynayaan carruurtu?




Cumar wuxuu ciyaarayaa  
kubbadda cagta.

Kubbadda cagta ayuu jecel yahay.

Waa ciyaartoy fiican.




Sahra waxay la ciyaaraysaa  
Farxiya.



Sahra iyo Axmed waxay tagayaan  
dugsiga.

Waxay la socdaan saaxiibkood  
Bashiir.




Macallinku wuxuu sawiray  
wiil iyo gabar.

Bashiir wuxuu qorayaa  
magaca gabarta.

Sahra waxay akhrinaysaa  
magaceeda.

*Af Soomaali 2, Muqdisho 1994: 141*

## 15.3 Baaskiil qurux badan




Cali wuxuu booqanayaa saaxiibkiis.

Saaxiibkiis waxa uu leeyahay baaskiil.

Waa baaskiil qurux badan.

Cali waxa uu rabaa in uu fuulo baaskiilka.




Cali wuxuu fuushan yahay baaskiilka.

Saaxiibkiis baa ku riixaya.

Cali ma wadi yaqaanno.

Wuu ka baqayaa.




Cali wuu dhacay.

Lug buu ka dhaawacmay.

Baaskiilku wuxuu yaallaa dhulka.

Cali saaxiibkiis wuu naxsan yahay.



Cali waxa la geeyay isbitaal.

Dhakhtarku wuxuu eegayaa lugta Cali.

Dhakhtarku wuxuu dawaynayaa Cali.

Cali wuu bogsan doonaa.

Cali wuu bogsan doonaa.

*Af Soomaali 2, 1994: 176-179*

# Unit 16

---

## 22.0

- Cali, ma macallin baa tahay?
- Maya, macallin ma ihi.

## 22.1

- Iska warran.
- Nabad.
- Cali, ma macallin baa tahay?
- Maya, macallin ma ihi.
- Maxaad ka shaqaysaa?
- Waxa aan ahay ministarka tacliinta.

## 22.2

- Sahra, ma karraaniyad baa tahay?
- Maya, ma ihi karraaniyad. Waxa aan ahay ardayad.
- Shire askari miyaa?
- Haa, askari weeye.

## 22.3

- Xabiibi ma macallimad baa?
- Haa, waa macallimad.
- Layla, ma darawalad baa tahay?
- Maya, darawalad ma ihi. Waxaan ahay askariyad.

## 23.0

- Muuse, ma karraani baa tahay?
- Maya, ma ihi karraani. Waxa aan ahay macallin.

### 23.1

- Muuse, ma askari baa tahay?
- Maya, askari ma ihi. Karaani baa aan ahay.
- Cadar ma macallimad baa?
- Maya, macallimad ma aha. Waa ardayad.

### 23.2

- Maxaa aad ka shaqaysaa?
- Askari baa aan ahay.
- Calina ma askari baa?
- Maya, waa ministarka difaaca.

### 23.3

- Kani waa kuma? Ma Cali baa?
- Haa, waa Cali Ismaaciil.
- Maxaa uu qabtaa?
- Waa arday.

### 24.0

- Isagu ma macallin baa?
- Maya, macallin ma aha. Waa karraani.

### 24.1

- Kani waa kuma?
- Waa Maxamuud.
- Isagu ma macallin baa?
- Maya, waa arday.

### 24.2

- Ma nabad baa?
- Waa nabad.
- Kani Xasan miyaa?
- Haa, waa Xasan Faarax.
- Ma karraani baa isagu?
- Maya, waa tarjubaan.

24.3

- Maxaad sheegtay?
- Nabad.
- Ninkaasi waa kuma?
- Waa Cabdillaahi.
- Isagu ma macallin baa?
- Haa, waa macallin.

24.4

- Kani ma buug baa?
- Haa, kani waa buug.

24.5

- Kani ma kursi baa?
- Maya, kani kursi ma aha.

24.6

- Kani miis miyaa?
- Haa, kani waa miis.

24.7

- Kani qalin miyaa?
- Maya, kani ma aha qalin.


**qálin** (m.) (Ar.) *pen penna*

24.8

- Ma warqad baa?
- Haa, waa warqad.


*Beginning in Somali (1966: 57–64)*

## 16.1 Saaxiibbada Wanaagsan



Dayib iyo Daahir waa saaxiibbo.

Dayib iyo Daahir waa deris.




Dayib iyo Daahir waa arday.

Dayib iyo Daahir  
dugsigay wada aadaan.



Dayib baa Daahir siiyay liin.

Daahir baa nuugay liin.





Dayib iyo Daahir baa  
wada aaday guryahoodii.

*Saaxiibbada Wanaagsan, Xafiiska Waxbarashada, Jigjiga 2016*



## 16.2 Xisaab

Saddex liin ah baa saaran miiska.





Nuur waxa uu qaatay hal.  
Immisa ayaa soo hartay?

Sahrana waxa ay qaadatay hal.  
Immisa ayaa soo hartay?




Calina waxa uu qaatay hal.  
Immisa ayaa soo hartay?

Saddex ukun baa ku jira saxanka.



Immisa ukun baa saxanka ku jira?

Immisa buug baa ku jira boorsadaan?



Immisa buug baa ku jira boorsadaan hadda?



Immisa xabbo oo muus ah baa ku jira dambiisha?



Immisa xabbo oo muus ah baa ku jira dambiisha hadda?

Muuse waxa uu soo iibsaday labaatan iyo shan digaag.

Waxa uu iska sii iibiyey saddex iyo toban.

Immisaa u soo hartay?

Cali waxa uu haystay laba iyo toban neef oo lo' ah.

Waxa uu soo iibsaday toddoba kale.

Immisa ayaa uu hadda haystaa?

Waxa aan haystaa afar buug,

Cumarna waxa uu haystaa siddeed buug,

Caashana waxa ay haysataa shan buug.

Waa immisa buug kulligood?

Aamina waxa ay haysatay saddex iyo toban kubbadood.

Waxa ay wiilasha siisay shan kubbadood,  
inta soo hartayna gabdhaha ayaa ay siisay.

Immisa kubbadood bay siisay gabdhaha?

Maxamed waxa uu haystay sagaal xabbo oo moos ah.

Immisa moos oo dheeraad ah buu u baahan yahay

si uu u haysto labaatan iyo kow xabbo oo moos ah?

Yuusuf waxa uu haystay sagaal iyo toban xabbo oo liin ah.

Waxa uu Saynab siiyey shan xabbo oo liin ah,  
toban kalena waxa uu siiyey Cali.

Immisa xabbo oo liin ah baa u soo hartay?

*Xisaab 1, Muqdisho 2001: 46, 129, 147*

# Welcome to continue

---

[Beginner's Somali Reader, Part 2](#)

[Beginner's Somali Workbook, Part 2](#)